9

Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska

SOM 009

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Bur-burka qoyska waa wax xun, waa waqti dhibaato badan ku beera dumarka iyo caruurtooda. Haddii adiga iyo saygaada aad kala tageysaan, waa in aad xallisaa arrimo badan oo sharci ah. Waa in aad meel saartaan kharashka reerka, aad isku af garataan caruurta iyo waa in aad kala qeybsataan hantida reerka. Howlahaani waa kuwo dhibaato badan. Dadka qaarkood way xallistaan arrimahooda ayagoon cidna u baahan. Laakiin sida ay u badan tahay waxaad u baahnaan doontaa cid kaa caawinta xallinta arrimahan.

Kolka uu xiriirkiina dhamaado, waa in aad heshaa qareen ku caawiyo oo xeerka qoyska yaqaano. Haddii aadan helin latalin ku aadan xeerka qoyska, waxaa dhici karta in aad waydo xaq badan oo aad lahayd. Aad bay muhimin u tahay in aad leedahay qareen ku caawiyo qaasatan haddii

- saygaadu uu kugu xad-gudbi jiray ama rabshoole ahaa
- saygaadu uu kugu amar taagleyn jiray ama ku handadi jiray
- saygaadu uu kaa faa'ideysan jiray
- saygaadu uu kaa awood badan yahay
- aadan wax akhrinin, ku hadlin ama fahmin luqadda Ingiriisiga
- saygaadu uu qareen u dooda leeyahay.

Sida loo helo qareen ku takhasusay xeerka qoyska

Haddii aadan aqoon qareen ku takhasusay xeerka qoyska, xarumaha hoostan ku qoran ayaa kaa caawini karo sida aad u heli lahayd qareen:

- xarunta bulshada ka caawinta arrimaha sharciyada ee degmadaada ku taalo (community legal aid clinic)
- hoyga ku meel gaarka ah (shelter) oo dumarka loogu talagalay ama xarumaha bulshada loogu adeego ee degmadaada ku yaalo
- khadka telefoonka loogu gargaaro dumarka lagu xadgudbay (**Assaulted Women's Helpline**) (416) 863-0511 ee Toronto ama midka lacag la' aanta ah 1-866-863-0511. Khadka dhagooleyaasha 1-866-863-7868. Waa khad telefoon oo gargaar lagu fidiyo 24ka saac.

- Xafiiska Xeerarka Qoyska (**Family Law Office**), haddii aad deggantahay Toronto, Ottawa ama Thunder Bay. Xafiisyadani waxay leeyihiin qareeno kaa caawini karo arrimaha qoyska. Kharashka qareenada waxaa bixiya hay'adda [Legal Aid Ontario (LAO)]. Qareenadan waxay aqbalaan dadka warqad ogolaasho ah ka soo helay hay'adda (legal aid).
- Haddii lagugu xadgudbay wac xafiiska Adeega ku Hagidda Qareenada **(the Lawyer Referral Service)** telefoonka 1-800-268-8326. Haddii aan lagugu xadgudbin waad isticmaali kartaa adeegan adigoo wacanaayo lambarka 1-900-565-4577, laakiin waxaa lagugu dallici doonaa $6 halkii marba.

Kolka aad la xiriirto qareen kugu cusub, hubso oo weydii in uu khibrad u leeyahay sharciyada xeerka qoyska. Ku dadaal in aad hesho qareen arrintaada khibrad u leh.

Sida aad u bixin lahayd kharashka qareenkaada xeerka qoyska

Adeega qareenka waa lacag. Haddii aadan awoodi karin kharashka qareenka, waxaad codsan kartaa hay'adda (**Legal Aid Ontario**) in ay kaaga bixiso kharashka. Qaar ka mid ah dhibaatooyinka arrimaha qoyska ayey hay'addan kharashkooda bixisaa. Si aad u codsato (legal aid), waxaad tagi kartaa xafiisyada LAO's midkood oo ku wada yaalo gobolka Ontario oo idil. Buuga telefoonada ka eeg xafiiska kuu dhow cinwaankiisa iyo telefoonkiisa, ama wac lambarka 1-800-668-8258 ama lambarka dhagooleyaasha (TTY) 1-866-641-8867. Haddii aad deggantahay magaalada Toronto, wac 416 979-1446. Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan xafiiska LAO waxaad ka heli kartaa shabakadooda interneetka www.legalaid.on.ca.

Si sharci ahaan laguu kaalmeyo (Legal Aid) waa in

- dhaqaalahaada uu yar yahay, iyo
- in dhibka ku haysta uu yahay mid "aad u culus" oo u baahan qareen.

Haddii lagugu xadgudbay ama lagugu amar taagleeyey u sheeg xafiiska kalmeenta shargica (Legal Aid). Sida ay u badantahay dumarka lagu xadgudbay way siiyaan warqadda legal aidka.

Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha Legal Aidka, waxaad heli doontaa warqadda **ogolaashada legal aidka**. Warqaddan ayaad ula tageysaa qareenka aad dalbatay in uu kuu adeego. Mararka qaarkood, Legal Aidka wuxuu kugu xiri karaa shuruud ah in aad lacagta dib ugu soo celiso.

Haddii uu jaalkaaga kugu xadgudbay ama kugu amar taagleeyey, waxaad heli kartaa warqadda ogolaashaha legal aidka oo ku go'an laba saacadood oo latalin qareen ah oo lagac la'aan ah. Ma u baahnid in aad soo caddeyso dhaqaale xumadaada si aad ku hesho noocan taakuleynta ah. Waxaad u baahantahay in aad buuxiso foomka lagu magacaabo "**Advice Lawyer Family Violence Authorization**" oo aad ka heli kartid xafiisyada adeega sharciyada ku aadan looga fidiyo bulshada (community legal clinics) ama guryaha sida ku meelgaarka ah ay dumarka u degganyihiin.

Qareenada kulligood ma wada qaataan warqadaha ogolaashada Legal Aidka. Kolka aad waceysid qareenka si aad ula ballanto, hubi in qareenka uu ogolyahay warqadaha Legal Aidka.

Maxaad sameyneysaa haddii aadan lahayn qareen

Haddii aadan lahayn qareen kaaga dooda arrimahaada qoyska, xogwarran iyo latalin ku aadan xeerka qoyska waxaad ka heli kartaa maxkamadda gudaheeda. Laba nooc oo adeega arrimaha qoyska ah ayaad ka heleysaa maxkamaddaha gudahooda oo idil:

- **Qareenada dadka lataliya (Duty counsel lawyers)**. Qareenadan shaqadooda waxay tahay in ay lataliyaan dadka dhaqaalaha yar oo aanan qareen u dooda wadan. Waxay ku siin karaan talo. Qareenadan haddii aysan mashquul ahayn, way kula geli karaan maxkamadda.
- **Xarumaha Xogwarranka Xeerka Qoyska (Family Law Information Centres)** (FLICs). Xaruntan waxay ku siin kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan xeerka qoyska waxayna kuu fasiri kartaa habka ay maxkamaddu u shaqeyso. Waaxay kaloo kuu tilmaami kartaa meelo kale oo qoysaska laga caawiyo, sida meelaha laga helo fasallada laga barto waalidnimada, laga barto sida loo dhex-dhexaadiyo qoysaska, ama cinwaanada xarumaha bulshada u adeega. Xarumaha (FLICs) qaarkood waxay leeyihiin qareeno lataliyeyaal ah **(advice lawyers)** oo kula kulmi kara. Qareenadan way kaala hadli karaan dhibaatadaada, wayna kula talin karaan, laakiin maxkamadda kaagama doodi karaan.

Maxkamadaha xeerka qoyska qaarkood, waxaad ka dhex heli kartaa arday sharciga yaqaana. Dadka qareenka aanan haysan ayey ka caawiyaan dhinaca buuxinta waraaqaha maxkamadda.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. **Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)**
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par : Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.